

LUUQADADA IYO SUUGAANTA

- Inay akhriyaan oo fahmaan noocyada kala duwan ee qoraalka maalin walba ah oo sababa badan oo kala duwan loo sameeyo (shaksi ah, dan khaas ah, waxbarasho). Inay waydiiyaan oo ka jawaabaan su'aalaha casharka ku saabsan, magacaabaan jilayaasha, iyo dhacdooyinka, iyo faahfaahinta.
- Gartaan calaamadaha casharka si ay u helaan meesha laga helo
- bartaan/ogaadaan faraqa u dhexeeya buugta kala duwan ee sheekooyinku ku qoranyihiin ama cilmiga laga helo
- inay sheegaan siyaabaha ay dhacdooyinka, jilayaasha ama qoraalka hal cashar ku jiraa u kala duwanyihiin ama isku mid u yihiin
- Inay kalmadaha akhriyaan ayagoo isticmaalaya hanaanka sanqadha, qaybo go'an,
- inay qoraan noocyada kala duwan ee qoraalada ah (hal abuurka, ak-hbaarta, sheekada iyo gabayada) oo ay habka qoraalka isticmaalaan inay wanaajiyaan oo horu mariyaan qoraalkooda (qoraalka qorsheeyaan, isku dubaridaan, dib isku waafajiyaan, oo qurxiyaan/daabacaan).
- Inay cilmibaaris sameeyaan ay koox ahaan kaga jawaabayaan su'aalaha ayagoo isku keenaya gunaanadka, oo wixii akhaabar ah dadka la wadaagaya.
- Inay dhegaystaan oo dhisaan dadka kale hadalkooda oo ay su'aalaan/kagana jawaabaan su'aalaha hadal dhamays tiran
- Inay isticmaalaan, xarfahaha waaweyn, calaamadaha qoraalka lagu kala sooco, iyo sida wax loo higaadiyo marka la qorayo.
- inay bartaan oo isticmaalaan kalmadaha macnayaasha badan leh ayagoo isticmaalaya istaraatiijiyado kala duwan (macne jumlada u dhiganta, iyo xarfaha kalmadaha laga hormariyo ama laga gadaal lagaga daro)

XISAABTA

- Inay akhriyaan, qorikaraan, oo ay matali karaan tirada idil ilaa iyo 120.
- Inay tirinkaraan ayagoo walxo wax lagu tiriyo haysta iyo ayagoo aan haysanba iyagoo horay iyo gadaalba u tiring karaan lambar kasta oo la siiyo ilaa iyo 120.
- Inay soo saaraan lambar 10 ka badan labarka la siiyey ama 10 ka yar lambar ka la siiyey.
- Inay is barbardhigaan ku samee lambarada ilaa laga gaarayo 120.
- Inay isticmaalaan Sawiro ama walxo kale si aad u xalislo masalooyinka ku-darta iyo ka jarta
- Isticmaal inaad lambarada jamciso ilaa 12.
- Tirada qaar ka bood adigoo tirinaya 2, 5, iyo 10.
- Inay sameeyaan hanaan sahlan oo ay wax ku muujinayaan ayagoo isticmaalaya sawiro iyo qaynuun (hanaankaani waxaa laga yaabaa inuu soo noqnoqanayo, korayo, ama naaqusayo)
- Inay soo saaraan lambarka isle'egta ka maqan iyagoo isticmaalaya xariirqa tirada ama walxo kale sida (3+? = 7).
- Inay isticmaalaan xaqiiqooyinka xisaabta kudarta iyo kajarta si ay u abuuraan jumalado lambaro ah.
- Inay gartaas oo ay sharaxaan shaxan laba qaab leh sida sadex xagalka labajibaaranaha, laydiga, iyo goobada.
- Inay gartaan oo sharaxaan shaxanada barbaroolayaasha sadexlaha ah sida kuwa loo yaqaan Prism, cylinder ama dhululubo, cones ama toobinka iyo spheres.
- Inay cabirikaraan dhererka walaxi leedahay ayadoo la isticmaalayo koobiyaal badan oo walaxdaasi leedahay (beniyaal, paper clips, iwm).
- Inay sheegi karaan aminta sida hal saac iyo hal saac barkiis.
- Inay garan karaan beniyaalka, shanta senti, iyo tobanka senti, oo heli karaan qiimaha koox laca qadaadiic ah oo gaaraysa ilaa hal doolar.

SAYNIS

- Inay isticmaalaan u fiirsasho (observation) si ugu taageeraan.
- Inay u fiirsadaan oo in waxyaabaha aan noolayn ay ka koobanyihiin qaybo ama xubno ay haddii midii maqantahay ama jabto aanay sii shaqayn karayn.
- Inay dhagaxda ku kala soocaan midabka, qaabka, iyo xajmiga.
- Inay sharaxaan kala duwanaanshaha iyo isku mid ahaanshaha ciida iyo dhagxaanta.
- Inay soo bandhigaan oo sharaxaan in waxuhu siyaabo kala duwan u dhaqdhaqaaqaan: sida layn toosan qalooc wareegsan, isla markaana ay ku socdaan xawaare kala duwan.
- Inay aqoonsadaan in biyuhu walax isku mid ah yihiin inkasta ay no-qonkaraan adke, dareere, oo ay hal waji iska badali karaan oo midkale isu badali karaan.
- Inay isticmaalaan qalab ay ku sharaxi karaan xaaladaha cimilada ee ay ku jiraan qaboowga iyo kulaylka, roobka, soo bixitaanka qoraxda/dhacitaankeeda, iyo dabaysa xawaaraheeda/jihadda
- Waa inay fahamsanyihiin inay dabayshu culays leedahay meel buuxin karto, oo yeelan karto awood ay wax ku riixdo si ay walxaha udhaqaaq- jiso.
- Waa inay sharaxaad ka bixin karaan siyaabaha ay quda riixida iyo qaadidu ay waxaha ku dhaqaaqin karto.

CILMIGA BULSHADA

- Fahamka nololaha wanaagsan, qawaaniinta, balanqaadka dhaarta.
- Fahamka faa'iidada iyo khasaaraha, waxaad doorbido, yaraanshaha, iyo isku badalashada
- Fahamka maababka, meelaha, qaabka iyo dabeecadaha aadanaha
- Fahamka qorshaha wakhtiga iyo sida nolashii hore ee qoysasku ahayd iyo sida ay hadda tahay.

CAAFIMAADKA

- Inay gartaan istaraatiijiyada la la xiriira dhinaca maskaxda, maanka (emotional), iyo caafimaadka bulsho,
- Inay fahmaan habka jirka bani aadamku u shaqeeyo, koritaanka bani aadamka,
- Inay la socdaan caafimaadka iyo fayada maskaxda, dabeecada, iyo nafaqada iyo tusmooyinka caafimaadka.
- Inay fahmaan badbaadadooda iyo arimaha ku taxaluqa arimaha la xiriira caafimaadka bay'ada.

MUUQAALKA IYO HABKA GUDASHADA HAWLAHA

- Inay sahaniyaan, ogaadaan, oo sameeyaan, ayagoo isticmaalaya curi-yayaasha safka ku jira sida qaababka, midabka, foomka, iyo dharka (Texture).
- Inay sameeyaan shaqo farshaxan ah oo isgaarsiinta la xiriira si loogu muujiyo sheekooyin iyo fikrado.
- Inay ogaadaan waxyaabo muusikada ku jira sida meldy, rhythm, harmony, dynamics, tone color, texture, iyo form.
- inay sameeyaan waxyaabo taxane ah dhaqdhaqaaq ah oo ay ku ci-yaarayaan ay qoob ka ciyaarka ku dheelayaan waxaana ka mid ah jirka, dhaqdhaqaaqa, goob lagu dheelo, wakhti la dheelo, iyo tamar lagu dheelo.
- inay abuuraan oo ay muujiyaan fikradahooda dhaqdhaqaaq, sanqadha, iyo sawaxanka luuqada.

TACLIINTA JIRDHISKA

- Inay sameeyaan dhaqdhaqaaqyo iyo istaraatiijiyado looga baahyanay dhaqdhaqaaqyada jirka ee kala duwan.
- Inay si joogtaagt ah uga qaybgalaan hawlaha jirdhiska oo xoog leh.
- Inay gaaraan oo joogteeyaan heer caafimaad oo ku filan.
- Inay muujiyaan oo soo bandhigaan musuuliyad xaga shakhsiga ah ama bulshada oo dhan khusaysa bulshada oo dhan.
- Inay dhaqdhaqaaqa jirka u qiimeeyaan sida caafimaadka shakhsiga, ku raaxaystaan, oo ay la halgamaan. .
- Inay fahmaan fikrada asaasiga ah ee ka dambaysa